

SOMALI VOICE OF NEW ERA, PROGRAM NO 1059

THE BOOK OF AMOS 6:9-7:1-8

Halkani waa raadiyo Transworld oo idinku soo dhowaynaya barnaamij tafsiir ah oo soconaya muddo nusa-saac ah. Waxaana barnaamijkan Codka Waayaha Cusub ee waxbaridda ah idiin soo diyaariya Masiixiyiin Soomaali ah, waxaana laga maqlaa barnaamijkan habeenka Isniinta ilaa iyo habeenka jimcaha, saacaddu markay tahay 7:25ka fiidnimo, mawjadda 31ka miterband.

OPENING SINGNATURE TUNE UP 25 SEC. AND UNDER.

Mar kale ayaannu dhegaysatayaal idinku soo dhowaynayaa barnaamijka, waxaannu horey idiinku sii wadaynaa daraasaadka aynu ka soo xiganayno kitaabka qoduuska ah ee aynu ugu magac-darnay, **"Dhex-marka Kitaabka Qoduuska ah."** Waa barnaamij aad ku baranaysaan kutubta Babaylku uu ka kooban yahay, haddii ay ahaan lahaayeen kuwii Axdigii Hore iyo kuwa Axdiga Cusub.

Waxaannu horey idiinku sii wadaynaa dhegaystayaal casharradii aynu ka soo xiganaynay kitaabkii Caamoos oo ahaa nin Ilaah farriin ugu soo dhiibay boqortooyadii woqooyi xilli ay ku baraareen hawlahooda, laakiin haddana ay Ilaah ka dheeraadeen. Caamoos ma ahayn nin la mid ah culimadii waxbaratay ee wakhtigiisa, wuxuuse ahaa nin uu ka dhex shaqaynayno Ruuxa Qoduuska ah ee Ilaah. Mar uu la hadlayey Dadka reer binu Israa'iil ayaa nebigu wuxuu iyaga garansiinayaa waxa ku soo socda oo ah in magaalada la burburin doono.

Wuxuuse u sii sheegayaa in dembiyadooda aawadood

Ilaah burburin doono magaalada Beytal. Intiise aan burburku ku dhicin qaranka ayaa waxaa dadkii lagu wargelinayaa inay Ilaah u soo leexdaan si bal wax un uga badbaadaan. Waxyaabaha nebigu kula hadlayo reer binu Israa'iil waa waxyaabo caam ah oo khuseeya qaran waliba. Wuxuuna leeyahay, sida ku qoran kitaabkii Caamoos 5:14-15, waxaana nebiga uu leeyahay, iyadoo Ruuxa Qoduuska ahi ka dul hadlayo, **"Wanaagga doondoona, sharkase ha doondoona, aad noolaataane, oo sidaasuu Rabbiga ah Ilaaha Ciidammadu idiinla jiri doonaa sidaad u tidhaahdeen. Sharka nebcaada, oo wanaaggajecclaada, oo caddaalad iridda ku sameeya, waayo, waxaa suurtoowda in Rabbiga ah Ilaaha ciidammadu uu u roonaado kuwa reer Yuusuf ka hadhay."**

SONG: REEL-----CUT-----

Markii noogu dambaysay waxay inoo joogtay dhegaystayaal meeriska cutubka 6aad aayaddiisa siddeedaad. Waxaannu soo barannay in haddii qaran uu isku dhiibo dembiga sinada, faakihiysiga iyo weliba sakhradda in qarankaasu uu burburayo, waxaa kaloo kala taga goyska kan sakhraanka ah, oo ilmihiisana waxaa ku dhaca dalanbaabi iyo macluul saa'id ah.

Maxaa wacay kii iyaga u shaqayn lahaa baa waxaa ku dhacay cudur aad u xun oo ah inaanay waxba deeqin. Muxuu ilmaha siinayaa isagii baaba cunaya madax jaad ah, ama fuustooyin khamri ah. Kan qaran madax u ah, isna kuwa uu xukumo way ku hoos bakhtiyayaan, waayo wixii qaranka lagu dhisi lahaa waa lagu sakhraamay.

Haddaba waxay ku shaqaysan jireen madaxdii waagaas musuqmaasuq iyo inay ashcaarta maqsinnaadooda ku jirta sare ugu qaadaan masaakiinta dalka joogta, haddii kale faakihiysiga ay u baahan yihiin taabbagal noqon maayo. Ilaahan waxyaabahaas wuu neceb yahay, oo lama tuso musuqmaasuq iyo hunguri weynan iyo keli cunnimo. Wuxuu doonayaa in insaanku isku naxariisto oo midba kan kale uu fahmo. Haddaan horey idiinku sii wado meeriska cutubka 6aad ayaannu idiin akhriyeynaa aayadda 9aad, waxaana qorniinka qoduuska ahi leeyahay leeyahay sidatan:

"Oo haddii toban nin guri keliya ku hadho way dhiman doonaan."

Waxaa haddaba mufasiriinta qaar ay ku macneeyaan aayaddaas sagaalad in dagaallada lagu soo qaaday woqooyiga Israa'iil uu keenay baaba' iyo weiba geeri aan fara-yarayn oo umaddiina ay ku dhammaatay sida ay u badan tahay. Markii dagaal waddan ka bilowdo waxaa yaraanaya waxyaabihii daruuriga ahaa ama lagama maarmaanka u ah nolosha. Waxaana taas ay sababaysaa in dad badan gaajo u dhintaan, kuwana ay cudurro u dhintaan, kuwana ay xabbad ku dhintaa, kuwana ay dhaawac u dhintan. Weli waxaannu ku jirnaa meeriska cutubka 6aad, oo ka soconaya baalka 1147 ee Axdigii Hore. Waxaana aayadda 10aadi leedahay sidatan:

"Oo markii nin adeerkiis oo ah kan isaga gubi doona uu kor u qaado inuu lafaha guriga ka soo bixiyo, oo uu ku yidhaahdo kan guriga gudahiisa shishe ku jira, War weli ma qaar baa kula jooga? Oo isna uu yidhaahdo, Maya, markaasuu ku odhan

doonaa, War naga aamus, waayo, waa inaannaan magaca Rabbiga soo qaadin."

Waxaad mooddaa haddaba in warbixinta qidcadu ay dhib badan tahay in la garto. Waxaanay dantu keenaysaa inaan balasha kutubka mufasiriintu ay ka qoreen qidcadaad rogrogno. Waxaanan eegaynaa mufasirka la yiraahdo Ditoor Charles L Feinberg faaladiisa. Marka wuxuu ku bilaabay oo uu leeyahay ninna garan maayo belaayadii colaaddu inta ay baaxaddeedu ahayd ama gaarsiisnayd sida ku qoran aayadda 10aad. Markii haddaba qofkii bud-dhigaha u ahaa qoyska uu yimaado, ayuu wuxuu kuwii baxsaday weyddiinayaa oo leeyahay: "War imisa ayaa inaga hartay, markaasaa kii badbaaday leeyahay, **"Intii guriga ku noolayd keligay baa ka haray."**

Marka ay sidan tahay aaska dadka reer binu israa'iil wuxuu lahaan jiray shuruuc, oo nin waliba ma duugi karo qofka, haddaanu xigtadiisa ahayn. Qoys waliba wuxuu leeyahay bud-dhigayaal meydka astura. Ninkii bud-dhigaha ahaa markii uu yimaado, illeen meydku wuu fara badan yahaye, ayuu weyddiinayaa ninkii badbaaday inta xalay dagaallada ku go'day, markaasuu leeyahay, keliday baa haray.

Waxay ku tusaysaa inta baaxadda colaaddu ay la eg tahay waa toban qof oo hal meel ku hoyata ayaa waxaa ka haray hal qof, boqol qof oo deris ahaana waxaa ka hartay 10 qof. Kun qof oo tuulo wada-degganaydna waxaa ka hartay 100 qof. Markaa Israa'iil waxay ahayd bulsho kitaabka qoduuska ah ku dhaqanta oo waxay asturi jireen meydka.

Waxaana asturaadda meydka laynoogu qoray kitaabka

Bilowgii 2:1. Ha yeeshee markii qof uu meyd asturayo wuxuu noqonayaa haran ilaa iyo wakhti, waxaana ugu dambaynta daahirinaya wadadka. Balse markii meydku uu bato, oo dagaallo awgeed dad badan isku mar la dilo ayaan laga fursanaynin in dab lagu gubo si looga dheeraado in meydka qofka oo bararaya uu keeno cudurro.

Waxaana taas ay ku qoran tahay kitaabka Samuu'eelkii kowaad 31:12, markaasoo nebigu uu lahaa: **"Waxaa kacay raggii xoogga lahaa oo dhan, o habeenkii oo dhan ayay sii guuraynayaan, markaasay Beytshaan derbigiisii ka soo qaadeen Saa'uul meydkiisii yo meydadkii wiilashiisa, kolkaasay yimaaadeen Yaabeesh, oo halkaasay ku gubeen."**

Markaa in meydka la gubo waxaa keenaya degdegsiinyada loo doonayo in meydka isla markiiba la asturo. Waxaa markaa iyaga ku furmi doona tashwiish iyo cabsi markii Rabbigu ciqaabta ku soo dejiyo, oo reer Ashuur ay dalka soo galaan oo qaybsadaan, oo laayaan ragga dagaal-yahanka ah iyo in waliba ee gaashaan qaad ah iyo carruurtaba.

Waxay markaas noqonaysaa si intii hartay looga badbaadiyo cudurro in dadka la gubo, laakiin maahan nidaam lagu dhaqmo wakhtiga nabadda. Wakhtiga nabadda dadka si wanaagsan baa loo asturaa oo meydka waa la dhaqayaa, waxaana loo aasayaa isla sida Soomaalidu ay meydadkooda u aasaan, waxaana qofkii la gelinayaa karfantii caddayd.

haddaan horey idiinku sii wado dhegyastayaal meeriska cutubka 6aad oo gebagebo maraya ayaannu

imminka idiin akhriyeynaa aayadda 11aad, waa baalka 1147, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

"Waayo, bal eeg, Rabbigu waa amraa, oo daarta weyn waxaa lagu dhufan doonaa daldalool, guriga yarna waxaa lagu dhufan dildillaac."

Waxaa markaa muuqata in qof waliba ha ugu horreeyaan carruurta ilaa iyo cirroolaha kuwa badbaada oo dhan waxaa loo kaxaysan doonaan dalka reer Ashuur. Weli meeriska cutukbka lixaad ayaannu ku jirraaye, waxaannu idiin akhriyeynaa aayadda 12aad waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

"Miyaa fardo dhagaxa ku ordi doonaan? Miyaase mid halkaas dibi ku beerjeexi doonaa? Laakiin, idinku garsooriddii waxaad u beddesheen xameeti, oo midhihi xaqnimadana waxaad u beddesheen dacar."

Su'aal buu nebigu weyddiinayaa dalladdii culimada ee reer binu Israa'iil iyo weliba dadkii dhegaysanayey, wuxuuna leeyahay: **"Miyaa fardo dhul dhagax ah ku ordi karaan?"** Haddaba ninkii fardaha wax ka yaqaan ayaa garanaya e, farduhu dhulka dhagaxda leh kuma ordi karaan, haddii aad ku khasabtana lug baa u baxsanaysa oo waa kula roghanayaan.

Weliba dhulka dhagaxda ah beero lagama samayn karo oo nebigu wuxuu leeyahay, **"Miyaase mid halkaas dibi ku beerjeexi doontaa?"** Isagoo u fasiraya sida dembiyadoodu ahaayeen ayaa nebigu wuxuu leeyahay, **"Laakiin, idinku garsooriddii waxaad u beddesheen xameeti, oo midhihi xaqnimadana waxaad u beddesheen dacar."**

Waxay Israa'iil sameeyeen waxyaabo ka soo horjeeda damiirkooda, oo weliba xaqnimadana aan

oggolayn ama aan waafaqaynin. Waxaana nebi Caamoos uu leeyahay, **"Waxaad u dhaqmaysaa si nacasnimo ah, oo faras baad dhul dhagax ah ku wadaysaan, beerana waxaad doonaysaan inaad dhul dhagxaan ah ka beertaan, miyaa taasi soconaysaa,"** buu leeyahay Rabbigu?

Haddaan caqli-celinta nebiga horey idiinku sii wadno ayaannu imminkana idiin akhrinaynaa aayadda 13aad ee cutubka 6aad, waxaana Qorniinku qoduuska ahu leeyahay sidatan:

"Waxaad ku rayraysaan waxa aan waxtar lahayn, oo waxaad tidhaahdaan, Miyaannaan geeso kula soo yeelan xooggayaga."

Waxay ku faani jireen xooggooda iyo itaal-kooda iyo sida ay maalka ama hantida u tabcadeen iyo maalkii ay xooggooda ku samaysteen. Waxaanay intuba u dhacaysaa cududda milateri ee uu lahaa Yaaraabcaam. haddaan horey idiinku sii wadno meeriska cutubka ayaannu dhegaystayaal isla eegaynaa kitaabkii Caamoos 6:14, waxaana qoran sidatan:

"Laakiinse bal eega, dadka dalka Israa'iilow, Rabbiga ah Ilaaha ciidammadu wuxuu leeyahay, Quruun baan idinku soo kicin doonaa, oo iyana waxay idinku dhibi donaan tan iyo meesha Xamaat laga galo iyo ilaa webiga Carabaah."

Waxaa Rabbigu ku leeyahay reer Binu Israa'iil, ciidanka reer Ashuur waxay idinku silcin doonaa meesha laga galo Xamaat, ilaa laga oo gaaro webiga Carabaah ee cidlada ku dhex yaalla. Waxaa nebigu sii sheegayaa in dhul baaxad weyn ay soo geli doonaan oo cadowgu aanu ninna reebi doonon,

wuxuuna ka soo gelayaa dhanka woqooyi.

Cadowganu maahan boqorkii reer Suuriya, laakiin waa boqorka reer Ashuur, kaasoo dadkan u wadan doona musaafuris. Waxyaabaha dembiyadoodu ay keeneen waa wax naxdin leh, oo waxay dhaxlsiiyeen gunnimo iyo guri-ba'ay. Nin waliba ee sharciyada Ilaah ku xad-gudba isagana belaayaa haysata, oo Ilaah cidna uma cafiyo dembiyada gaboodfalka ah ee la gelayo.

Waxaa dhegaystayaal intaas ku soo dhammaanaya cutubkii lixaad oo aynu ku soo barannay sida Ilaah u halakeeyo kuwa sharciyadiisa quursada oo aan xaqnimada ebyin. Waxaanan soo aragnay saddexdii dembi ee burburisay qaranka Israa'iil, waxay kaloo dunuubtaas u burburisaa qofka shakhsiga ah iyo qarankaba isku si. Haddaan intaas uga baxno haddaba mawaacidadii cutubkii lixaad ayaannu imminka u guda-gelaynaa dhegaysatyaal:

CUTUBKA TODDOBAAD EE KITAABKII

NEBI CAAMOOS

Wuxuu haddaba cutubkani ama uu u horreeyaa qaybta sadexaad ee kitaabka Caamoos u kala boxo ama qaybsamo. Haddaba saddexdan cutub ee ugu dambeeya kitaabkan Caamoos waxaa ku jira muuqaallo ama muujin nebiga la tusay oo la kaamili doono wakhti mustaqbalka ah. Inkastoo Caamoos dadka qaarkii ay ugu yeeri karaan reer baadiye haddana suugaan iyo xigmad buu ku hadlayaa, oo qaar ka mid ah muuqaallada Rabbigu isaga u muujiyey waa kuwo cajiib ah. Waxaana haddaba ugu horreeya muuqaallada kan ku saabsan ama ka hadlaya:

MUUQAALKA TUSNIINTII AYAXA.

Haddaan horey idiinku sii wadno meeriska cutubka 7aad ayaannu dhegaystayaal idiin bilaabaynaa kitaabkii Caamoos, cutubka 1:1, baalka 1148 ee Axdigii Hore, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

"Sayidka Rabbiga ahu wax buu i tusay, oo bal eeg, wuxuu sameeyey ayax markii fufkii dambe bilowday, oo bal eeg, waxay ahayd fufkii dambe markii boqorka cawskiisa la gooyay dabadeed."

Wuxuu leeyahay nebigu haatan, **"Rabbigu wax buu i tusay, oo bal eeg, wuxuu sameeyay ayax, oo bal eeg waxay ahayd fufkii dambe."** Waxaa wakhtigaas nebigu tilmaamayo la tusay ayax koronkorro, waxaana wakhtigu ahaa marka boqorka cawskiisa la gooyay dabadeed. Haddaba wakhtigaas laba goor ayaa beeraha wax laga soo guri jiray, mid waa marka boqorka cashuurtiisa la bixinayo, oo waxaa dadka laga qaadi jiray in ka badan boqolkiiba toban.

Waxay bixin jireen dadku marka toban meelood loo qaybiyo saraacii u soo go'ay ee beeraha saddex qayb oo ka mid ah. Waxaana qaadan jiray boqorka intaas oo boqorka. Markii haddaba boqorku helay cashuurtiisii ayaa waxaa dhulka ka bilowday ayax iyo koronkorro, waxaana dadkii koray ciqaab dhulkii ruxday, oo fadhiga ayey ka kaceen. Haddaan horey idiinku sii wado meeriska cutubka 7aad ee kitaabka Caamoos ayaannu imminkana idiin kahrinaynaa aayadda 2aad, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

"Oo markay dhammeeyeen cunitaankii cawskii dalka ayaan idhi, Sayidow, Rabbiyow, waan ku baryayaaye, na cafi, waayo, bal reer Yacquub sidee bay isu

taagi doonaan? Waayo iyagu waa yar yihiin."

Markii Caamoos muuqaalka loo muujiyey wuxuu Ilaah la hor yimid salaad, oo wuxuu leeyahay, haddii masiibadan inagu dhacdo, innagoo aan tabar weyn lahayn, Rabbiyow sidee baannu isu taagaynaa qaran iyo goys ahaanba? Weli Rabbigu ciqaabta ma saarin reer binu Israa'iil. Weli waxaannu ku jirnaa meeriska cutubka 7aad, waxaana nebigu leeyahay sida ku qoran aayadda 3aad sidatan:

"Markaasaa Rabbigu taas ka soo noqday, oo Rabbigu wuxuu yidhi, taas ahaan mayso."

Markaan hadalka idiin gaabiyo, Rabbigu wuxuu leeyahay, sidaas ku samayn maayo haatan, ka gadaal markii nebi Caamoos Ilaah u baryay dadka--oo wuxuu oggolaaday inaanu wiiqin reer binu Israa'iil, inkastoo ciqaabtu ahayd mid aan laga fursan doonin, waayo dadku ka soo noqon maayaan dembiyadooda. Bal imminkana aynu eegno:

MUUQAALKII DABKA AHAA EE

NEBIGU ARKAY

Waxaa nebiga oo waxyigiisii dadka u sheegaya uu immanka u guda-gelayaa tusniintii labaad ee loo muujiyey sida ku qoran aayadda 4aad ee cutubka toddobaad ee kitaabkii Caamoos, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

"Sayidka Rabbiga ahu wax buu i tusay, oo bal eeg, Sayidka Rabbiga ahu wuxuu amray in dab lagu diriyo, oo dabku wuxuu laastay moolkii weynaa, oo wuxuu cuni lahaa dhulka."

Mufasiriin badan ayaa waxay rumaysan yihiind dabka halkan looga hadlay inaanu ahayn kan abaaraha dhacaya ama yimaada. Waa run in dabka iyo abaaruhu

ay wada socdaan, oo markii dhulku abaar yahay, dab ayaa kaynta guba, oo wuxuu ku faafaa Buuraha. Waxaana marakrka qaarkood dabka dhaliya taxaddarla'aanta qofka. Dabka ayaa mararka qaar ka bilowda sigaar qof cabbayo, miyaanay taas ahayn axmaqnimo ku timid in la sahashado waxa dabku keenayo?

Balse dabka ugu weyn ee beryaheenna dunida ka dhaca waxaa dhaliya abaaraha. Dabka nebigu ka hadlayana waa dab caadi ah, Caamoosna caad ma saarin ama hadalka, waxba uma dedin dadkii reer binu Israa'iil.

Haddaan horey idiinku sii wado meeriska cutubka 7aad ayaannu imminka idiin akhriyeynaa aayadda 5-6, waxaana qorniinku leeyahay sidatan:

"Markaasaan idhi, Sayodow, Rabbiyow waan ku baryayaaye jooji, waayo, bal reer Yacquub sidee bay isu taagi doonaan? Waayo, iyagu waa yar yihiin. Markaasaa Rabbigu taas ka soo noqday, oo Sayidka Rabbiga ahu wuxuu yidhi, taasuna ahaan mayso."

Sida abbaarta ah, Ilaah wuxuu soo diray roob, oo dabkiina sidaas ayuu ku joogsaday, oo Rabbiguna mar kale ayuu maqlay ducadii Caamoos u ducaynayey dadkiisa. Marka nebigu uu leeyahay Ilaah wuu ka soo noqday, ayey taas u dhigmaysaa in uu joojiyey qorshihii hore ee dabka lagu halaagayey iyaga. Haddaba saaxiib ayaandarrada dadka maanta haysata waxaa weeye inay afka ka sheegtaan inay Masiixa naxariista badan u yimaadeen.

haddana aanay dhab ahaan u raacin, oo ay lumaan abadan. Bal sidee baa mid Ilaah uga hor imanayaa,

oo uu u liidayaa siismadii uu dadka siiyey Masiixa. Ilaah wuu ina wada jecel yahay, oo in isaga lagu dembaabana waa ayaan darro, iyo wax aan habboonayn. Waxaa haddaba la soo gaaray maaddadii saddexaad ee khusaysay ama ku saabsanayd:

TUSNIINTII SADDEXAAD EE

NEBI CAAMOOS.

Waxaannu dhegaystayaal imminka la soo kala baxaynaa baalka 1148 ee Axdigii Hore 7:7-8, waxaana nebiga oo Ruuxa Qoduuska ahi ka dul hadlayaa uu leeyahay sidatan:

"Oo haddana wax buu i tusay, Oo bal eeg, Sayidku wuxuu ag istaagay derbi xarig miisaan lagu lagu sameeyey, Isagoo xadhig miisaan leh gacanta ku haysta. Markaasaa Sayidku wuxuu igu yiri, Caamoosow, maxaad aragtaa?"

"Oo anna waxaa ku iri, Waxaan arkaa xadhig miisaan leh. markaasaa Sayidku wuxuu igu yiri, Bal eeg, Anigu xadhig miisaan leh baan dhigi doonaa dadkayga Israa'iil dhexdooda: Oo mar dambena iyaga iska dhaafi maayo."

Waxaannu haddaba ku arkaynaa xadhiggan qiyaaseed meelo badan oo qorniinka ah lala isticmaalay. Waxaa ka mid ah halkii aynu ku soo aragnay kitaabkii Yeremyaah 31:38-39, waxaana qorniinka qoduuska ah leeyahay sidatan:

"Oo haddana Rabbigu wuxuu leeyahay, Bal ogaada, waxaa iman doona wakhti Rabbiga magaalada looga dhisi doono munnaaradda Xanaaneel iyo tan iyo iridda gooladdeeda ama rukunkeeda, oo xadhigga qiyaastuna wuxuu horey ugu sii gudbi doonaa tan iyo buurta Gaareeb oo ka sii horraysa, Oo xagga

Goocaahna, wuu u jeesan doonaa."

Markaa xarigga qiyaastu meelo badan oo qurniinka ka mid ah ayuu ku qoran yahay, waxaana kaloo lagu sheegay kitaabkii Sakeryaah o o aynaan Weli gaarin iyo kii Ishacyaah oo aynu horey u soo barannay iyo kii Daanyeel sida ku qoran cutubka 5:27aad. Habeenka xiga ayaannu dhegaystayaal horey idiinku sii wadi doonaa meeriska cutubka 7aad ee kitaabkii Caamoos.

SONG: REEL-----CUT-----

Halkani waa TWR, Idaacadda TWR oo idinku leh Ilaah haydin barakeeyo oo haydinku anfoco wixii aad caaway ka maqasheen barnaamijka. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli-doontaan habeen dambe (hadahan oo kale) isla mowjaddan 25ka miterban. Haddiise aad doonaysaan inaad fikirkiinna ka dhiibateen wixii aad caaway maqasheen ayaad nagala soo xiriiri kartaan somtwr@twr.co.ke.

Waxaad kaloo waraaqaha noogu soo qortaan: P.O.Box 21514, oo koodku yahay 00505. Waxaa kaloo aan idin siin doonaa website aad ka maqashaan barnaamijyadeenna Soomaaliga ah, si kuwiinna doonaya inay koorasyo ka qaataan Baybalka ay ugu hirgasho.

SIGNATURE TUNE UP 6 AND UNDER

Halkani waa TWR oo idiin rajaynaya Habeen Baraare iyo barwaaqaba leh. Inta aynu ka gaari doonno wakhti aynu ku kulanno Barnaamij la mid ah kan caaway aad maqasheen, waxaan idinku leenahay nabadda Ciise Masiix, ha idiinku badato xagga jidhka iyo ruuxaba Aamiin

Somttb 1059. Soft-Scripted on 06-18-2019 by SOMTTB. Schedule for airing on 16-01-2020